


Sida dugsiyadu go'aan uga gaari doonaan buundooyinka GCSE ee 2021:

Tilmaamo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha ardayda Ingiriiska u isticmaala Luuqad Dheeraad ah (EAL) ahaan



Tilmaamahaan muxuu ka kooban yahay?

Halkaan waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan sida dugsiyadu u go'aamin doonaan buundooyinkaaga GCSE ee xagaaga 2021 iyo tallooyin ku saabsan waxa aad sameyn karto si aad isugu diyaariso.

Sanadkii la soo dhaafey, dugsiyo badan waxay ku khasbanaadeen iney xirnaadaan mudo dheer sababo la xiriira cudurka faafa ee Covid-19. Arrintaan/sababtaan awgeed, dowladdu waxay go'aamisay inay cadaalad darro tahay in la qaato imtixaannada GCSE ee sannadkaan. Taas badalkeeda, macalimiinta ayaa ku imtixaani doona oo dhibcahaaga go'aan uga gaari doona siyaabo kale.

Bug tilmaameedkaan wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan:

- Sida dugsiyada iyo macalimiintaadu ay u go'aamin doonaan buundooyinkaaga
- Waxa ay yihiin xuquuqahaaga iyo waxa aad sameyn karto haddii aadan ku qanacsanayn buundadaada ama buundooyinkaaga
- Waxa aad sameyn karto si aad ugu diyaar garowdo imtixaanka macalinka

Si aad u akhrido tilmaamaha dawlada oo dhameystiran, booqo <https://www.gov.uk/government/publications/awarding-qualifications-in-summer-2021/awarding-qualifications-in-summer-2021>

1. Sidee ayay dugsiyadu go'aan uga gaari doonaan buundooyinkaaga?

Dugsiyad ayaa ardayda badankood laga xirey usbuucyo badan oo waxbarista inteeda badan waxay ka dhacday khadka tooska ah muddadaas. Taasi waa sababta ay dowladda u go'aansatay in imtixaannada lagu beddelayo qiimeyn ay macallimiinta u sameeynayaan heerarka GCSE, AS iyo A.

- Ma jiri doonaan imtixaano aad qaadan doontid xagaaga 2021. Macallimiintu waxay qiimeyn ku samayn doonaan shaqadaada taas oo kaliya ku saleysan shaqada aad qabatay intii lagu guda jirey casharadii aad khadka tooska ah ka baratay iyo waxbarashada fasalka. Macallimiintu waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan imtixaannada buundooyinkooda aan la xisaabin sida caadiga ah iyo waraaqaha qiimeynta ee laga helo guddiyada imtixaanka si ay gacan uga geystaan go'aaminta buundooyinkaaga.
- Ma jiraan imtixaanno xagaagan laakiin in la helo buundooyin fiican ma ahan inay ka dhib badnaato sannadahii kale.
- Haddii macallimiintaadu aysan ku barin dhammaan casharrada ku jira barnaamijkooda waxbaridda ("manhajka"), waxay keliya kugu qiimeyn/imtixaani doonaan waxyaabaha ay ku bareen.
- Si loo go'aamiyo fasalkaaga, macallimiintaadu waxay eegi karaan dhammaan shaqooyinka aad ka soo saartay koorso maaddo ah, tusaale ahaan, shaqo kasta oo aad u dhammaystirtay luuqadda Ingiriisiga intii lagu jiray Marxalada 4 aad.
- Macallimiintaadu waxay go'aan ka gaari doonaan buundooyinkaaga goor dambe sannadkan gudihisa. Taas waxaa u sabab ah waxay rabaan waxbarashada inay sii socoto illaa inta suurtagal ah maaddaama casharro badan la seegay intii lagu jiray xayiraadda. Macallimiintu waa inay go'aan ka gaaraan buundooyinka ugu dambeyn **18 Juun 2021**.
- Maadooyinka qaarkood ee dugsiyada sare waxay leeyihiin qiimeyno kala duwan oo imtixaannada ah, tusaale ahaan maadooyinka sida Qoob-ka-Cayaarka, iyo Naqshadeynta iyo Teknolojiyada. Kuwaani waa *qiimeyno aan imtixaan ahayn* (NEA). Waa inaad sii wadataa u diyaar garowga NEA-yadaada: macallimiintaada ayaa saxi doonaan, waxayna qayb ka noqon doonaan buundooyinkaaga kama dambeysta ee maadooyinkaas.
- Fadlan ha ka welwelin haddii aadan dhammeyn karin NEA-daada sababo la xiriira wax dhacay oo uu ugu wacan yahay cudurka faafa ee Covid-19. Haddii ay taasi dhacdo, wax dhib ah kaagama imaan doonaan mana waayi doontid wax buundooyin ah.
- Heerarka GCSE, AS iyo A, Farshaxanka iyo Naqshadeynta, buundooyinkaaga waxaa keliya lagu salayn doonaan wadarta shaqooyinkii aad ka soo qabatay. ("Wadarta shaqooyinka" waa isku keenista dhammaan sawiradaada, dukumiintiyada iyo naqshadaha ee aad ka sameysay mowduucan/maadadan.)

2. Maxaad sameyn kartaa haddii aadan ku qanacsanayn buundooyinkaaga?

Haddii aadan ku qanacsanayn buundooyinka aad heshay, waxaad weydiisan kartaa inay wax ka badesho. Tani waxaa loo yaqaan "racfaan ka qaadashada buundooyinkaaga". Waxaad u baahan kartaa inaad sidaas u sameyso laba sababood awgood:

1. Khaladaadka maamulka ama habraaca:

Dhibaatooyinka waxaa sababa qof si qalad ah buundooyinkaaga u geliya kumbuyuutar ama foom.


- Marka hore waa inaad ka codsataa dugsiiga inuu hubiyo inay khaladka sameeyeen.
- Haddii qalad jiro, dugsiigaaga ayaa la xiriiri doona guddiga imtixaanka. Haddii guddiga imtixaanku oggolaado, waxay baddeli doonaan buundooyinkaaga.



2. Khaladaadka ka dhasha xukminta tacliinta:

Khaladaadkaan waxaa sababa macalin, haddii uu tayada shaqadaada u saxiixo si qaldan, sidaad u aragto.

- Haddii uusan jirin khalad ka dhashay maamulida ama habraaca, waxaad weydiisan kartaa dugsigaaga inuu rafcaan u diro guddiga imtixaanka ayagoo adiga ku matalaya (tani waxaa loola jeedaa ayagoo isticmaalaya “magacaaga”). Guddiga imtixaanka waxay go'aan ka gaari doonaan haddii macallinkaaga ee saxiixay shaqadaada uu sameeyey *khalad* tacliimeed. Haddii ay kugu raacaan, buundadaadawaa la baddelayaa.
- *Khaladaadka* tacliinta ee uu sameeyay macallinkaagu waa inay ahaadaan kuwo aad u culus si guddiga ay wax ka bedel ugu sameeyaan buundooyinkaaga.



Xusuusnoow in nidaamka racfaankaagu uu boondooyinkaaga wax ka jari karo waxna ku dari karo.



Waxaad **10 Agoosto 2021 heli doontaa buundooyinkaaga heerarka AS iyo A sidoo kale 12 Agoosto 2021 waxaad heli doontaa buundooyinkaaga GCSE.**

3. Maxaad sameyn kartaa kahor intaan macallimiintaadu go'aan ka gaarin buundooyinkaaga?

Kahor intaanay macallimiintaadu go'aan ka gaadhin buundooyinkaaga oo aynaan u dirin guddiyada imtixaanka marka la gaaro xilliga xagaaga, waxaa muhiim ah inaad sii wado shaqada adag ee aad ka hayso dugsiga. Hadda wali waa waqti aad muhiim u ah. Waad wanaajin kartaa buundooyinkaaga haddii aad sida ugu fiican ugu dadaasho inta u dhexeysa hadda illaa iyo xagaaga.

U diyaar garowga imtixaanada:

- Ka fikir maaddooyinkaaga kala duwan. Go'aami kuwa maaddooyinkaas ka mid ah ee u baahan shaqo dheeraad ah marka loo barbardhigo kuwa kale, maaddooyinka ayaad ku fiican tahay, oo kuwee ayaad ku daciifsan tahay?
- Ma jiri doonaan imtixaanno, laakiin macallimiintaadu waxay u isticmaali karaan waraaqaha imtixaankii hore ama su'aalo laga soo saarayo waraaqiha imtixaanaadkii hore kuwaas oo qayb ka noqon doona qiimeyntaada. Baro sida looga jawaabo su'aalaha imtixaanka adigoo:
 - Hubinaya haddii aad fahamayso macnaha erayada tilmaan bixinta ee ku jira waraaqaha imtixaanaadkii hore ([khayraadkaan](#) laga helo Trinity Immigration Initiative waxay kuu noqon karaan kuwo wax tar kuu leh)
 - Dib u eegaya, xasuusanaya oo isticmaalaya ereyada tilmaan bixinta ee ku jira casharadaada
 - Aqoonsanaya ama hoos ka xariiqaya ereyada tilmaan bixinta ee ku jira su'aalaha
 - Sharaxaad u sameynta jawaabaha moodhelka ah (haddii aad qabto moodhelada noocaas ah)
- Waxbarashada khasab ma aha inay noqoto Ingiriis oo keliya: waxaad taqaannaa wax ka badan hal luuqadood. Waxaad baari kartaa mowduucyadaada iyo maaddooyinkaaga adigoo ka raadinaya webseedyada adigoo isticmaalaya luuqadaada waxaadna daawan kartaa fiidiyowyo ku baxaya afkaaga.
 - [Khan Academy](#) waa meel wanaagsan oo muraajac loogu samayn karo mowduucyo badan oo maaddooyinka ah waxaana lagu tarjumay 30 luuqadood oo kala duwan.
- Waalidiintaada ama dadka kale ee waaweyn ee gurigaaga jooga ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan shaqadaada. Haddii waalidiintaadu ku hadlaan Ingiriis yar, waxay kaa caawin karaan luuqaddaada qoyska.



Xirfadaha Ka Shaqeysiinta Macluumaadka Kujira Maskaxda:


Xirfadaha Ka Shaqeysiinta Macluumaadka Kujira Maskaxda waxay kuu oggolaaneysaa inaad fahamto sida aad wax u baraneyso, u qorsheyneyso, una hubinayso waxa aad taqaan. Waa xirfado aad muhiim u ah, gaar ahaan kahor qiimeyntaada/imtixaankaaga kama dambaysta ah. Waxaad kobcin kartaa xirfadahan adigoo:



- Imtixaan ka qaadaya naftaada (kahor intaanay macallimiintaadu ku imtixaanin) adigoo naftaada weydiinaya su'aalahan:
 - Maxaan durba aqaanaa?
 - Maxaan weli garanayn?
 - Maxaan rabaa in aan barto marka xigta?
 - Maxaan samayn doonaa si aan u barto waxaas?
- Qorshe u sameynaya waxa aad baran doonto:
 - Tani waxay noqon kartaa in aad ku darto kaalandarka, sawir ka samayso, jaantus ku qorto ama waraaq meel ku dhegsan. Waa qorshahaaga, sidaas darteedna waxaad ku qoran kartaa afkaaga hooyo.
 - Shaqadaas weyn u kala qeybi tallaabooyin yaryar. Si ay u noqdaan kuwo fudud oo lagu dhammaystiri karo hal maalin lana xasuusan karo si loo qabto.

Muhiimadda ay leedahay horumarinta xirfadahaaga luqadda Ingiriisiga:

Sababtoo ah dhammaan shaqada iyo qiimeyn kasta oo aad sameyn doonto waxay ku bixi doonaan luuqadda Ingiriiska, sidaas darteed aad ayey muhiim u tahay inaad sii wado horumarinta luuqaddaada Ingiriiska. Waxaad macalimiintaada si fiican u tusi doontaa aqoontaada iyo xirfadahaaga hadii aad si cad oo sax ah u sheegi karto. Tixgeli fikradahan si aad u horumariso luqaddaada Ingiriisiga:



- Raadi saaxiib aad kala hadli karto shaqadaada iyo qiimeyntaada idinkoo isticmaalaya luuqadda ingiriisiga. Waxay sidoo kale dib u eegis ku samayn karaan oo ay qiimeyn ku samayn karaan shaqadaada qoraalka ah kahor intaan u dhiib macalinkaaga.
- Akhri inta aad kari karto. Waxay kaa caawin doontaa inaad kobciso fahamka aad ka qabto naxwaha iyo ereyada Ingiriisiga. Waaad isticmaali kartaa 'akhristayaasha darajooyinka leh', kuwaas oo ah buugaag dib loogu qoray heerar kala duwan ee dadka akhrista luuqadda Ingiriisiga (tusaale ahaan, kuwa billoowga ah, dhex-dhexaaka, kuwa sareeya). Labaduba [Penguin Graded Readers](#) iyo [Macmillan Graded Readers](#) waxay leeyihiin buugaag badan oo noocaas ah.
- Kobci luqaddaada rasmiga ah ee Ingiriisiga adigoo dhageysanaya khudbadaha iyo casharrada ku saabsan mowduucyada kaladuwan. [TED Talks](#) waa webseedka wanaagsan oo leh fiidiyooyin fara badan. Ku dhowaad dhammaantood waxay leeyihiin qoraalada fiidiyowga hoostiisa lagu soo qoro oo ku qoran afaf badan.
- Istimmaal qaamuusyada laba luuqadoodka ah. Haddii goyskaagu uusan kuu iibin karin, waxaad dugsiigaaga ka codsan kartaa inuu mid kuu soo gado. Haddii midaas aysan macquul ahayn, waxaad isticmaali kartaa websaydh khadka tooska ah sida [Google Translate](#).
- Ku billoow qaamuus qoraaleed (qaamuus yar) si aad ugu qorto ereyada muhiimka ah ee ku jira maadooyinka aad barato oo erayadaas u bedel luqadaada. Waxaad dib ugu soo laaban kartaa liiska ereyada goor dambe haddii aad ilowdo macnaha ereyada.

Copyright

Dhamaan xaquuqaha dabaacaada waa la ilaaliyey. Iyadoo aan loo eegin isticmaalka la ogol yahay ee buug-tilmaameedkaan "Sidee ayey iskuulladu u go'aamin doonaan buundooyinka GCSE sanadka 2021: Tilmaamaha loogu talagalay ardayda luuqadda Ingiriisiga u isticmaala Luuqad Dheeraad ah (EAL) ahaan" ayaa ah kuwan soo socda: "Macallimiinta waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay tilmaamaha la wadaagaan waalidiinta ardaydooda iyagoo isticmaalaya iimayl, boostada, ama fool-ka-fool. Waxaa sidoo kale la soo jeedinayaa in macallimiintu ay haayaan nuqulada warqaddaha luuqadda, iyo nooc Ingiriis ah oo warqaddaas ah si ay tixraac ugu sameeyaan, inta lagu jiro wadahal kasta oo ay la yeelanayaan waalidiinta." Ma jirto qeyb ka mid ah daabacaadan dib loo soo saari karo qaabkey doonto ha noqotee (oo ay ku jirto in loo kaydiyo qaab kasta oo elektaroonig ah iyo haddii is kama kamac ah loogu isticmaalo qaab kale) iyadoon oggolaansho qoraal ah laga helin milkiilaha xuquuqda daabacaada. Codsiyada lagu raadinayo oggolaanshah qoran ee xuquuqda daabacadda milkiilaha si koobi looga soo saaro qeyb ka mid ah daabacaadan, waa in loo diraa daabacaha.

Copyright © The Bell Educational Trust Limited (oo u shaqeynaysa The Bell Foundation ahaan)

The Bell Educational Trust Limited waa shirkad samafal oo ku xaddidan lambarka dammaanadda 1048465, oo la aasaasay 5 tii Abriil 1972, waana hay'ad samafal oo ka diiwaangashan Hay'adda Samafalka lambarkeeduna yahay 311585

The Bell Foundation, Red Cross Lane, Cambridge CB2 0QU